



MINISTRY FOR HOME AFFAIRS, NATIONAL SECURITY AND
LAW ENFORCEMENT



Dib u noqoshada Aan Khasabka ahayn ee La caawiyo iyo Dib ula qabsiga Bulshadda (AVRR) ee Malta

Qayb macluumaad Faa'iido badan ah oo Carruurta Muhaajiriinta ah ayaan Lala socon gudaha Malta.



IOM Malta

Cinwaanka: 12, Antonio Agius street, Floriana FRN 1135, Malta
Saacadaha ay ftahay: Isniinta (15:00 – 17:00); Arbaca (15:00 – 17:00);
Jimce (10:00 – 12:00)

Telefoonka: +356 2790 0050; toos ah: +356 7937 4613

Iimayl: iommalta@iom.int

Shabakada: <https://malta.iom.int/>



Magan galyada, Socdaalka iyo Dib ula qabsidga bulshadda 2014 – 2020

Mashruuca waxaa qayb ahaan maalgelisa Midowga Yurub
heerka la wada maalgeliyo. 75% EU Maaliyadaha 25% Maaliyadaha ka
Faa'iidaystaha

Maamulka Waara ee Qulqulka Socdaalka hijirada ah



Ku saabsan IOM

Ururka Caalamiga ah ee Socdaalka (IOM) waxa uu xafiisyo ku leeyahay adduunka oo dhan. IOM waxay ilaalisaa oo taageertaa dadka socdaalka ah. IOM sidoo kale waxay caawin kartaa dadka sidaada oo kale oo ka fekeraya wax ku saabsan ku noqoshada wadankii.

Bal ka waran haddii aan ka fekerayo wax ku saabsan ku noqoshada wadankii?

Hablaha iyo wiilasha sidaada oo kale waxay u yimaadaan Malta asbaabo kala duwan. Xarunta soo dhawaynta halka aad ku nooshahay, shaqaalaha bulshadda waxay halkaas u joogaan si ay kuu daryeelaan adiga oo kuu ilaaliyaan. Way kuu sharaxi karaan adiga xalkaaga gudaha Malta oo waxay arkayaan waxa aadka kuugu habboon adiga mustaqbalka.



Tani, shaqaalahaaga bulshadda ayaa habsan doona in:

- Uu jiro qof (masuul sharci ah) oo go'amada kula gaadhi doona si wada jir ah gudaha Malta iyo wadankiigii. Wadankaagan, qofkan waxa uu noqon karaa qof qoyskaaga ah ama qof ku daryeeli kari adiga.



- Qoyskaaga waa lala xidhiidhi doonaa, si loo arko haddii ay ku soo dhawaynayaan adiga oo ku daryeeliyaan adiga.




- Waxaad u malaynayso iyo waxa aad doonayso waa lagu xisaabtamayaa.



- Haddii aad rabto inaad wadankii ku noqoto oo ay tani tahay xalka kuugu wanaagsan adiga, shaqaalaha bulshadda waxa uu la xidhiidhi karaa IOM.



- IOM way kula kulmi doonaan adiga iyo shaqaalahaaga bulshadda, oo ka jawaabi su'aalahaaga ku saabsan dib ugu noqoshada wadankii oo kaala hadli doonaan taageerada aad u baahan tahay.




Sidee IOM ii caawin kastaa?

- IOM waxaa la waydiin karaa inay hesho qoyskaaga ama ay la xidhiidho oo la hadasho qoyskaaga, si ay wax badan kaaga ogaato, iyo xaalada xaga wadankii ah. Tani waxay caawin kartaa fahanka doorashooyinka ugu wanaagsan ee aad leedahay.



- Haddii aad wadankii dib ugu noqonayso waa xalka kuugu wanaagsan adiga iyo haddii aad rabto inaad sidaas samayso, IOM waxay la xidhiidhi doontaa Wasaarada Malta ee Socdaalka, Amniga qaranka iyo Sharci fulintat. Wasaarada way xaqiijin doontaa haddii IOM ay kugu caawin karto inaad dib ugu noqoto wadankii si badbaado ah oo waxay ka jawaabi doontaa baahiyahaaga ka hor iyo ka dib noqoshada.



- IOM markaa way habayn doontaa safarkaaga (iyaddoo kaa caawinaysa helida warqaddahaaga safarka, soo iibinta tigidhada safarka), waxay kaa caawin doontaa bilaabida qorshaynta mustaqbalka, oo waay ku caawin doontaa tallaabo kasta, ilaa aad gaadho wadankii. Hadadi aa dka yar tahay 15, qof ka socda IOM ayaa kula safri doona.



- Gudaha wadankaaga, 'IOM oo ay la joogaan qoyskaaga ama qof ku daryeeli kara, ayaa kugula kulmi doona xaga garoonka diyaarada.



- Tani waa bilow kuu cusub adiga. IOM waxay kaa caawin doontaa inaad jidkaaga hesho. Tusaale ahaan, waxaad dib ugu noqonaysaa dugsigii, ama waxaad bilaabi barashadda shay cusub oo faa'iido badan mustaqbalka.



Xusuuso:

- U noqo si **AAN KHASAB AHAYN**. Fikradahaagu aad ayay muhiim u yihiin. Waxaad go'aan ka gaadhi kartaa wakhti kasta, oo aanad in dheeraad ah doonayn inaad soo noqoto.
- IO ma awoodi doonto inay kaa caawiso inay kugu celiso wadankaaga haddii jirto khatar noloshada ah.
- Caawimada IOM waa bilaash. La kullanka IOM waa gaar waana qarsoodi. Haddii loo baahdo, turjubaan ayaa inaga caawin doono si laguula hadlo.
- Gudaha wadankaaga, IOM waxay ku siin karaan lacag caddaan ah, laakiin waxay ku bixin doonaan baahiyahaaga iyo waxa aad aqbasho inaad samayso.